

## OGEYSIISKA MUHIIMKA AH EE DACWADA KOOXDA IYO XALINTA

*Maxkamad ayaa ogolaatay in lagu soo diro Ogaysiiskan.  
Tani ma ahan wax codsi ah oo ka socda qareen. Adiga laguma dacwaynayo.*

- Xalin (“Xal”) ayaa lagaf gaaray dacwada kooxda ku eedeeyeyso in milkiilaha The Apartment Shop, LLC, iyo milkiilayaasheeda iyo shirkadaha la xiriiro, Stephen Frenz, Spiros Zorbalas, Equity Residential Holdings, LLC, National Housing Fund, LLC, ERT, LLC, Quarters for Creativity, Ltd., Emerald Square Properties, Inc., Hennepin Quarters, Inc., Powderhorn Quarters, Inc., Hiawatha Quarters, Inc., 25 & 3146 Properties, Inc., Lahaha Holdings, Inc., Arts Avenue Properties, Inc., SS Quarters, Inc., Berkeley Holdings, Inc., 1801 Properties, Inc., SZ112, Inc., S1322, Inc., R110, Inc., G121, Inc., Alpha-Omega Companies, Inc., JAS Apartments, Inc., Jennifer Frenz, iyo 2020 Vision Investments, LLC (collectively, “Eedeysanayaasha”), ay ku xadgudbeen sharciga gobolka Minnesota iyaga oo kireysanayo dabaqyo (“Dhismooyinka”) iyada oo aan jirin shati ku haboon iyo si nidaamsan oo joogta ah oo na guuldareystay joogteynta Dhismooyinka sida looga baahanyahay sharciyada caafimaadka iyo badbaadada. Dhoor qof ee ka kireystay Apartment Shop ayaa dacweeyay Eedeysanayaasha iyagoo sheeganaya xadgudubyada Xeerka Ka hortaga Minnesota ee Qiyaanada Macmiilka, Dhaqamada Qiyaanada ee Ganacsiga Minnesota, Sharciga Heshiisyada Milkiilaha sida waafaqsan Minn. Stat. § 504B.161, sidoo kale sida xayeysiinta Beenta ah, Shirqoolka Rayidka, iyo Amarka.
- Maxkamada waxay u ogolaatay dacwada inay ahaato dacwad koox taas oo matalayso dhamaan dadka haysto heshiisyada daganaanshaha ee Eedeysanayaasha xiliga Nofeembar ama kadib Nofeembar 13, 2012, waxaana dhinacyada dacwada ay kadib ogolaadeen inay xaliyaan.
- Xalinta waxay siisaa lacago caddaan ah dadka guryaha ka ijaartay Eedayanayaasha inta u dhaxeysay Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018.
- Diiwaanada eedayanaha ayaa muujinaya inaad adigu ka ijaartay guryo eedeysanayaasha intii u dhaxaysay Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018. Sidaas darteed, waxaad xaq u leedahay lacag caddaan ah oo aad ka helayso Xalinta.

**Fadlan si taxaddar leh u akhri Ogaysiiskan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrintan ayaa laga heli karaa [www.MinneapolisApartmentLitigation.com](http://www.MinneapolisApartmentLitigation.com)**

WAA MAXAY XULASHOYINKAAGA?	
<b>WAXBA HAQABAN</b>	<b>Ku jir dacwadaan oo hel qeyb Xalinta ah.</b>  Haddii aadan waxba sameyn, waxaad heleysaa lacag caddaan ah, haddii Maxkamada ansixiso Xalinta. Laakin, waad waynaysaa xaquuqo walba ee lagu dacweynayo mid walba oo ka mid ah Eedeysanayaasha ama mid walba oo ka mid ah milkiilayaashooda, xubnahooda, saamiileydooda, saraakiishooda, shaqaalahooda, jaga hayayaasha horeeyay, ama u xilsaarida sida gooni ah ee isla sheegashooyinka dacwada ee dacwadaan ama wax ku saabsan sheegashooyinka kale ee loo keenay sida sheegashooyinka kale ee la xiriira dacwadaan.
<b>WEYDII IN LAGAA REEBO</b>	<b>Ka bax dacwaddan. Wax faa’ido ah haka helin. Hayso xaquuqaha.</b>  Haddii aad weydiisato in laga reebo dacwadaan maku heleysid Xalinta kama haysid lacag caddaan. Laakin, waxaad haysanaysaa xaquuqahaaga si aad u dacweysid mid walba oo ka mid ah Eedeysanayaasha ama mid walba oo ka mid ah milkiilayaashooda, xubnahooda, saamiileydooda, saraakiishooda, shaqaalahooda, jaga hayayaasha horeeyay, ama u xilsaarida sida gooni ah ee isla sheegashooyinka dacwada ee dacwadaan ama wax ku saabsan sheegashooyinka kale ee loo keenay sida sheegashooyinka kale ee la xiriira dacwadaan. Haddii <b>AADAN</b> rabin inaad ka qeyb ahaatid dacwadaan, waa

	<p>inaad weydiisatid in lagaa reebo dacwadaan. Dhammaadka waqtiga ee looga reebayo nafsadaada Xalinta waa 35 maalmood kadib dirista Ogeysiintaan. (Micnaha kale, ogeysiintaada ka reebida waa inay shabada boostada saarantahay xiliga Diseembar 7, 2018)</p>
<p><b>U SHEEG MAXKAMADA INAADAN JECLEEN HESHIISKA XALINTA</b></p>	<p><b>Diid xalinta haddii aad aaminsantahay in xalinta ay cadaalo daro tahay ama aysan ku filneyn.</b></p> <p>Haddii aad tahay Xubin ka tirsan Kooxda oo aad aaminsantahay in Xalinta ay cadaalo daro tahay ama aysan ku filneyn, waad diidi kartaa Xalinta. Ma diidi kartid Xalinta haddii aad dooratid inaad ka baxdo Xalinta. Dhammaadka waqtiga lagu diidayo Xalinta waa 35 maalmood kadib dirista Ogeysiintaan. (Diidmadaada waa in lagu buuxiyaa Maxkmada oo loo geeyaa la-taliyaha ku qoran hoos xiliga Diseembar 7, 2018)</p>

- Xulashooyinkaaga waxaa lagu sharaxay Ogeysiintaan. Si loo weydiisto in lagaa reebo, waa **inaad** saxiixdaa “Foomka Ka bixitaanka,” ee ku lifaaqan kaas oo loogu soo raaciyay si laguugu dhib yareeyo, oo na soo dirtid 35 maalmood gudahood laga bilaabo marka la diro Ogeysiintaan. (Foomkaaga Ka Bixitaanka waa inay shabada boostada oo ah ka dibxiliga Diseembar 7, 2018 saarantahay)
- Maxkamada masuulka ah dacwadaan weli waa inay go’aan ka gaarto haddii la ansixinayo Xalinta. Haddii ay sameyso, iyo racfaano walba markii la xaliyo kadib, ama wakhti kale oo ay Maxkamada ogolaato, lacag caddaan ayaa la qeybin doonaa.

#### MUXUU KU SAABSAN YAHAY DACWADAAN, IYO MAXAAN U HELAY OGEYSIINTAAN?

Wakiilka Dacwoodayaasha wuxuu ku eedeeyay in Eedeysanayaasha ku xadgudbeen sharciga gobolka Minnesota iyaga oo kireynaya dabaqyada iyada oo aan jirin shati ku haboon iyo si nidaamsan oo joogta ah oo na guuldareystay joogteynta Dhismooyinka sida looga baahanyahay sharciyada caafimaadka iyo badbaadada. Eedeysanayaasha way diideen eedeymaha.

Dhinacyada waxay ku heshiiyeen inay xaliyaan dacwada.

Diiwaanada eedaysanaha ayaa muujinaya inaad adigu ka ijaaratay guryo eedeysanayaasha intii u dhaxaysay Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018. Ogeysiintaan waxay sharaxaysaa in Maxkamada ay ogolaatay, ama “xaqiijisay,” dacwada kooxda eedeysanaha ee adiga ku quseyn karo, waxayna sidoo kale sharaxaysaa in xisbiyada dacwada ku heshiiyeen inay xaliyaan, in lacagta dhinac loo dhigay si lacag caddaan loo siiyo dadka haysto heshiiska daganaanshaha ee Eedeysanayaasha ee u dhaxeeyo Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018. Waxaad leedahay xaquuqa sharciga ah iyo xulashooyin aad muujin kartid. Garsoore Mary R. Vasaly ee Maxkamada Gobolka Hennepin ayaa kormeeraya dacwada kooxda. Dacwada waxaa loo yaqaan *Flores, et al. v. Zorbalas, et al.*, Lambarka Dacwada. 27-CV-16-14225.

#### WAA MAXAY DACWADAN KOOXDA AH IYO YAA KU LUG LEH?

Dacwada kooxda eedeysanaha, hal ama dad badan oo loogu yeera “Wakiilada Kooxda” (kuwa dacwadaan waa Edain Altamirano Flores, Esperanza Herrera, Lori Nicol, Olutundun Arike Ogundipe, Jason Beck, Patricia Goggin, Norma Juarez, iyo Bruno Gorostieta) ayaa ku dacweeyeen matalaada dadka kale ee qabo sheegashooyin. Dadka oo dhan waa “Koox” ama “Xubnaha Kooxda.” Wakiilada Kooxda ee dacweeyay – iyo dhammaan Xubnaha Kooxda ee la midka ah – waxaa loo yaqaan Dacwoodayaasha. Shaqsiyaadka iyo shirkadaha ay dacweeyeen waxaa loo yaqaan Eedeysanayaasha. Dacwada kooxda, hal

maxkamad ayaa xaliso arimaha qof walba ee Kooxda – marka laga reebo dadka doortay inay ka baxaan Kooxda. Maxkamada kormeereyso dacwada ayaa u magacowday qareenada Dacwoodayaasha’ sida “La-taliyaha Kooxda” si ay u matalaan dhammaan Xubnaha Kooxda ee dacwada ku jiro.

Labadaba dhinacba waxay ku heshiiyeen Xalinta. Haddii Xalinta la ogolaado, dhinacyada waxay ka badbaadayaan qarashaadka iyo maxkamad saarid aan la hubin, Xubnaha Kooxdana waxay helayaan faa’idooyinka lagu qeexay Ogeysiintaan haddii Maxkamada ay ansixiso Xalinta. Eedeysanayaasha way diideen dhammaan sheegashooyinka sharciga ah ee dacwadaan ku jirto. Wakiilada Kooxda iyo qareenadooda waxay u maleeyaan in Xalinta la soo jeediyay tahay danaha ugu wanaagsan ee Xubnaha Kooxda.

### YAA KA QEYB AH XALINTAAN?

Garsoore Mary R. Vasaly ayaa go’aansaneyso in dadka oo dhan ee haysto heshiiska daganaanshaha ee Eedeysanayaasha oo u dhaxeeyo Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018, ay yihiin Xubnaha Kooxda sababtoo ah ujeedooyinka xalinta. Dhinacyada way ku heshiiyeen inay xaliyaan dacwada.

Looma baahno inaad wax sameysid hadda haddii aad rabtid inaad lacag caddaan ka heshid dacwadaan. Haddii aadan waxba sameyn waxaad ku jireysaa Kooxda oo waxaa ku matalayo La-taliyaha Kooxda, haddii Xalinta la ansixiyana, waxaad heleysaa lacag caddaan.

Haddii aadan dooran in lagaa reebo, waxaa laguugu soo rogayaa xukun walba oo ay gaarto Maxkamada, haddii ay wanaagsantahay ama haddii aysan wanaagsaneynba. Tani waxay la micna tahay in haddii aadan hadda waxba sameyn, kuuma suurtoogleyso inaad dacweysid, ama sii wada inaad dacweysid, mid walba ee Eedeysanayaasha, ama mid walba oo ka mid ah milkiilayaashooda, xubnahooda, saamiileydooda, saraakiishooda, shaqaalahooda, jaga hayayaasha horeeyay, ama wakiiladooda – iyaga oo ka qeyb ah dac walboo oo kale – oo ku saabsan isla sheegashooyinka sharciga ah ee ah dacwadaan ama ku saabsan sheegashooyinka kale oo loo keeni karo sida sheegashooyinka la xiriiro dacwadan.

Eedeysanayaasha waxay ku heshiiyeen inay bixiyaan \$18,500,000 si loo aasaaso “Deeqda Xalinta.” La-taliyaha Kooxda wuxuu weydiisan maxkamada inay ku abaalmariso wax ka yar hal qeyb sadex ka meel oo ah Deeqda Xalinta—wadar ahaan \$6,000,000—taas oo ah qidmooyinkooda ee lagu matalayo Wakiilada Kooxda iyo Kooxda. La-taliyaha Kooxda wuxuu sidoo kale weydiisan doonaa maxkamada in Wakiil walbo ee Kooxda lagu abaalmarayo \$10,000 taas oo ah “abaalmarinta dhiirogelinta” ee u adeegida Wakiilka Kooxda ee dacwada ahaan. Maxkamada ayaa go’aansaneyso in la abaalmarinayo qidmooyinka qareenka iyo abaalmarinada dhiirogelinta iyo tirada abaalmarinta noocaas ah. La-taliyaha Kooxda wuxuu sidoo kale weydiisan doonaa Maxkamada inay ogolaato lacag bixinta qarashaadka dacwada Dacwoodaha iyo qarashaadka macquulka ah ee lagu maamulayo xalinta (oo ay ku jiraan, laakin aan ku xadidnayn, qarashka lagu bixinayo ogeysiinta xalinta oo lagu qeybinayo lacag bixinada kaashka ee Xubnaha Kooxda) ee qayb ka ah Deeqda Xalinta, taas oo la filanayo inay wadar ahaan noqoto qiyaas ahaan \$465,000. Tirada Deeqda Xalinta ee harayso kadib lacag bixinta qidmada qareen walba, abaalmarinada dhiirogelinta, qarashaadka dacwada, iyo qarashaadka maamulka kooxda waxaa loo qeybinayaa Xubnaha Kooxda iyada oo ah lacag caddaan. Tirada Deeqda Xalinta ee \$18,500,000 oo harayso waxaa loo qeybinayaa kuwa ka midka ah Xubnaha Kooxda waxayna ku xirantahay (1) baaxada waqtiga ee Xubin walbo oo Kooxda ka mid ah oo lala xiriiri karo uu kireeysay qeybaha dabaq walba oo ka mid ah dhismaha dabaqa ku jiro ee arinta dacwadaan, iyo (2) tirada xubnaha kale ee kooxda ee lala xiriiri karo kuwaas oo si isku mar ah u kireystay qeybta (qeybaha) dabaq noocaas ah inta u dhaxeysay Nofeembar 13, 2012, iyo Oktoobar 24, 2018, taas oo laga go’aamin karo diiwaanada Eedeysanaha sida ugu macquulsan.

### SIDEE AYAAN U CODSADAA KA REEBIDA DACWADA?

Haddii AADAN rabin inaad ka qeyb ahaatid Kooxda, waa **inaad** saxiixdaa “Foomka Ka bixitaanka,” ee ku lifaaqan kaas oo loo soo raaciyay si laguugu dhib yareeyo , oo aad ku dirtid boostada lagu aadiyay:

Minneapolis Apartment Settlement Administrator  
P.O. Box 25848  
Richmond, VA 23260

**Foomka Ka bixintaanka waa inay shabada boostada saarantahay oo aan ka dambeyn: 35 maalmood gudahood la bilaabo markii Ogeysiinta la soo diro (taas oo ah Diseembar 7, 2018).**

**MIYAAN U BAAHANNHAY INAAN QABSADO QAREEN HADDII AAN KA QEYBQAATO DACWADAAN?**

Maya. Qareenada Dacwoodayaasha ee keenay dacwadaan ayaa loo magacaabay, “La-taliyaha Kooxda”, oo wuxuu matalayaa danaha macaamiisha ka qeybqaadanaysa dacwadaan. Maxkamada waxay u magacowday shirkada sharciga iyo qareenada xigga inay noqdaan La-taliyaha Kooxda:

**FAEGRE BAKER DANIELS LLP**

Michael F. Cockson  
Adam M. Nodler  
90 South Seventh Street  
Suite 2200  
Minneapolis, MN 55402  
Telefonka: 1-833-657-0515 ama 612-766-6952

**Haddii aad ka qeybqaadanaysid dacwadaan, lagaama rabo inaad bixisid qidmooyinka qareenada’ ama qarashaadka La-taliyaha Kooxda.** Qidmooyinka waxaa laga bixinayaa Deeqda Xalinta, sida ay amartay Maxkamada.

**MAXAA DHACAYO HADDII AAN KA BAXO DACWADAAN?**

Haddii aad ka baxdid dacwadaan – taas oo sidoo kale la micna ah inaad ka baxdo Kooxda, oo mararka qaar waxaa loo yaqaan “ka bixitaanka” Kooxda – ma heleysid lacag caddaanka ah ee xalinta. Si kastaba, waxaad haysaneysaa xaquuqda lagu dacweynayo Eedeysanayaasha iyo milkiilayaashooda, xubnahooda, saamiileydooda, saraakiishooda, shaqaalahooda, jaga hayayaasha horeeyay, ama si gooni u xilsaarida ah isla sheegashooyinka dacwada ee dacwadaan ama wax ku saabsan sheegashooyinka kale ee loo keeni karo sida sheegashooyinka kale ee la xiriira dacwadaan, haddii aad sameeysid gudadaha wakhtiga loo baahan yahay .

**SIDEE AYAAN UGU SHEEGAA MAXKAMADAHADDII AAN JECLEEN XALINTA?**

Haddii aad tahay Xubin ka tirsan Kooxda (oo aad ka bixin Kooxda), waad diidi kartaa qeyb walba oo Xalinta ah. Si aad u diido, waa inaad waqti macquul ah Maxkamada ka diwaan gelisa oo aad u dirtada (dhinaca boostada) La-taliyaha Kooxda iyo La-taliyaha Difaaca warqad ama qoraal kale oo qoran oo ay ku jiraan kuwa xigta:

- 1) Madaxa warqada oo ay ku jiraan magaca dacwada iyo lambarka dacwada—*Flores, et al. v. Zorbalas, et al.*, Lambarka Dacwada. 27-CV-16-14225;
- 2) Magacaaga, ciwaanka, lambarka taleefonka, iyo, haddii uu ku matalo La-taliyaha, magaca, lambarka astaanta, ciwaanka, iyo lambarka taleefonka ee la-taliyahaaga;
- 3) Bayaan saxiixian oo ah dhammaan diidmooyinkaaga Xalinta oo ay ku jiraan aasaaska sharciga iyo xaqiiqda diidma walba; iyo
- 4) Bayaanka ah haddii aad rabtid inaad ka imaatid dhageysiga si aad u go’amisid ansixinta Xalinta iyo codsiyo walba oo qidmooyinka iyo qarashaadka ah (“Dhageysiga Cadaalada ah”), adigoo oo uu kula jira La-taliyaha ama uusan kula jirin, iyo haddii uu kula jiro La-taliyaha, magaca La-taliyahaaga ka qeybgalayo.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad diidid, waa inaad ka diiwaan geliso diidmadaada Maxkamada oo aad u ku dirtid diidmadaada labada ciwaan (2) ee xiggo 35 maalmood gudahood laga bilaabo marka Ogeysiintaan la soo diro (taas oo ah Diseembar 7, 2018).

La-taliyaha Difaaca	La-taliyaha Kooxda
<p><b>Barna, Guzy &amp; Steffen, Ltd.</b> Bradley Kletscher 200 Coon Rapids Boulevard Suite 400 Minneapolis, MN 55433</p>	<p><b>FAEGRE BAKER DANIELS LLP</b> Michael F. Cockson James W. Poradek Adam M. Nodler Nathan Brennaman 90 South Seventh Street Suite 2200 Minneapolis, MN 55402 Teleefonka: 1-833-657-0515 ama 612-766-6952</p>

### MAXAY KU KALA DUWAN YIHIIN DIIDMADA IYO WEYDIINTA IN LAGAA BIXIYO?

Diidmada waa u sheegida Maxkamada inaad jecleen waxba ka mid ah Xalinta. Waxaad diidi kartaa Xalinta kaliya haddii aadan ka bixin. Ka bixida waa u sheegida Maxkamada inaad rabin inaad ka qeyb noqotid Xalinta. Haddii aad ka baxdid, ma lihid aasaaska lagu diidayo Xalinta sababtoo ah marna kuma saameynayso adiga.

### GOORMA IYO HALKEE AYAY MAXKAMADA KU GO'AAMINEYSAA ANSIXIDA XALINTA?

Maxkamada waxay qabaneysaa Dhageysiga Cadaalada ah oo lagu go'aansanayo haddii la ansixinayo Xalinta iyo codsiyo walba oo qidmooyinka iyo qarashaadka ah iyo abaalmarinada dhiirrogelinta Wakiilada Kooxda. Maxkamada waxay balamisay in Dhageysi Cadaalad ah la qabto Diseembar 27, 2018, 8:30 subaxnimo, laguna qabto Xarunta Dowlada Gobolka Hennepin, 300 South 6th Street, Minneapolis, MN 55487. Dhageysiga Cadaalada ah waxaa laga yaabaa in la qabto taariikh kale ama wakhti kale iyada oo aan jirin ogeysiin dheeraad ah, marka waa fikrad wanaagsan in laga fiiriyo [www.MinneapolisApartmentLitigation.com](http://www.MinneapolisApartmentLitigation.com) wixii macluumaad soo kordhey ah. Dhageysigaan, Maxkamada waxay tixgelin doontaa in Xalinta ay cadaalad tahay, macquul tahay, oo ay ku filantahay. Maxkamada waxay sidoo kale tixgelin doontaa codsiyada La-taliyaha Kooxda oo ah qidmooyinka qareenada iyo qarashaadka iyo abaalmarinada dhiirrogelinta ee Wakiilada Kooxda. Haddii ay jiraan diidmooyin, Maxkamada way tixgelin doontaa iyagana waqtigaas. Dhageysiga kadib, Maxkamada ayaa go'aamin doonto haddii la ansixinayo Xalinta. Lama garanayo inta go'aamadaan ay qaadanayaan.

### MA INAAN KA QEYBGALAA DHAGEYSIGA?

Maya. La-taliyaha Kooxda ayaa ka jawaabayo su'aalaha Maxkamada qabi karto. Laakin, waad ka soo qeybgali kartaa dhageysiga adiga oo qarashaadkaaga isticmaalaya. Haddii aad soo dirtid diidmo, lagaagama baahno inaad imaatid Maxkamada si aad uga hadashid. Haddiiba aad soo gudbisay diidmadaada oo qoran ka hor dhamaashada wakhtiga aqbalga, aadna ku dirtay ciwaanada saxda, oo na ay waafaqsantahay dhammaan sharuudaha kale ee lagu xusay kor, Maxkamada way tixgelin doontaa. Waxaad sidoo kale qabsan kartaa qareenkaaga gaarka ah si uu uga qeybgalo dhageysiga, laakin muhiim ma ahan.

### MAKA HADLI KARAA DHAGEYSIGA?

Maxkamada ayaad ogolaansho aad uga hadashid Dhageysiga Cadaalada ah weydiisan kartaa. Si aad sidaas u sameysid, diidmadaada la diiwaan geliyay wakhtiga saxda waa in lagu daray bayaan tusaya inaad rabtid inaad ka imaato Dhageysiga Cadaalada ah (fiiri kor).

Kuma hadli kartid dhageysiga haddii aad ka baxdid Xalinta.

### KA WARAN HADDII AAN SU'AALO QABO?

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan dacwadaan, fadlan booqo [www.MinneapolisApartmentLitigation.com](http://www.MinneapolisApartmentLitigation.com), ama la xiriir La-taliyaha Kooxda ama Maamulaha Xalinta:

La-taliyaha <b>Kooxda</b>	<b>Maamulaha Xalinta</b>
<b>FAEGRE BAKER DANIELS LLP</b> Michael F. Cockson James W. Poradek Adam M. Nodler Nathan Brennaman 90 South Seventh Street Suite 2200 Minneapolis, MN 55402 Teleefonka: 1-833-657-0515 ama 612-766-6952	Minneapolis Apartment Settlement Administrator P.O. Box 25848 Richmond, VA 23260

Dhammaan wacitaanada waxaa lagu haynayaa qarsoodi.

**SU'AALAHA HAKU AADININ MAXKAMADA**

Soo diritaanka Ogeysiintaan adiga waxaa ansixiyay Maxkamada Degmada ee Gobolka Hennepin. **Ha ula xiriirin Maxkamada ama Xafiiska Karaaniga wixii warbixin dheeraad ah.** Badelkeeda, fadlan la xiriir La-taliyaha Kooxda ama Maamulaha Xalinta sida lagu tilmaamay kor.

**FOOMKA KA BIXITAANKA**

*Edain Altamirano Flores, et al. v. Spiros Zorbalas, et al.*  
Lambarka Dacwada. 27-CV-16-14225

**Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka baxdid dacwadaan, buuxi Foomkaan, saxiix, oo ku soo dir: Minneapolis Apartment Settlement Administrator, P.O. Box 25848, Richmond, VA 23260.**

**Ha buuxin oo haku soo celin foomkaan haddii aad rabtid inaad ku jirtid xalinta oo aad rabtid inaad heshid qeyb xalinta ah.**

**Waa inaad ku soo dirtaa foomkaan:** 35 maalmood gudahood laga bilaabo marka lagu soo diro Ogeysiinta Dacwada Kooxda iyo Xalinta (taasi waa, wa in la soo diraa wakhti aan ka dambeyn Diseembar 7, 2018).

Waxaan codsanayaa inaan ka baxo dacwada kooxda. Waan fahamsannahay in midaan ay la micna tahay inaan sinaba uga qeyb noqoneyn dacwada kooxda ayna i khuseeynin xalinta la gaaray.

Taariikhda:	_____	Saxiixa:	_____
Magaca (fadlan daabac):	_____	_____	_____
	Koowaad	Dhexe	Dambe
Ciwaanka:	_____	_____	_____
	Ciwaanka Wadada	Caasimada	Gobolka Furaha Zip-ka

**FOOMKAAN WAA INAY SHABADA BOOSTADA OO AH 35 MAALMOOD GUDAHOOD LAGA BILAABO DIRISTA OGEYSIINTA DACWADA KOOXDA IYO XALINTA SAARANTAHAY OO NA LAGU SOO CELIYO:**

Minneapolis Apartment Settlement Administrator  
P.O. Box 25848  
Richmond, VA 23260